


# SAMBABKA RIYAHA

**Afka Ingriisiga waxaa lagu yiraahdaa 'Contagious Caprine Pleuropneumonia (CCPP)**

## Cudurka

Cudurka ***Sambabka Riyaha*** meelaha ay Soomaalida xoolo-dhaqatada ahi degto waxaa looga yaqaan magacyo kala duwan oo ay ka mid yihiin :
***Riinweyne***, ***Haarweyne*** iyo ***Gees-dhowr***
Magacyadaasi mid kastaaba wuxuu sifaynayaa ama tilmaamayaa astaamaha ay dadku ku arkeen neefka cudurkani ku dhaco ama hadba xoolaha nooca uu saameeyo; Riinweyne iyo Haarweyne oo macnahoodu isku dhow yahay waxay tilmaamayaan ***taah*** ama **jibaad** muujinaya in neefku aanu si caadi ah u neefsan karin oo dhibaato jirto.
***Gees-dhowr*** macnihiisu waxaa weeye cudurkan wuxuu eegtaa geeska riyaha oo keliya laakiin kuma dhaco idaha ay xerada ku wadajiran.
Magaca ***Sambab*** laftiisu wuxuu sheegayaa in cudurkaasi saameeyo sambabada neefka uu ku dhaco.

## Cudur Keenaha iyo Isugudbinta

Cudurka ***Sambabka Riyaha*** waxaa keena nooc ka mid ah nafleyda yar-yar ee loo yaqaan ***Bakteriyada*** qayb ka mid ah.
Habka isugudbintu ama sida ay xooluhu isu qaadsiiyaan badanaaba waa mid ***toos*** ah ; markii neefka buka neeftiisu ama dheecaanada habka neefsigu (duufka /qufaca) gaadhaan kan fayow ama neefka caafimaadka qaba.
Sida magaciisu sheegayo cudurkani wuxuu ku dhacaa oo gaar u yahay riyaha ama ari cadka
Cudurkan Sambabku deg-deg ayuu ugu fidaa ama ugu faafaa riyaha, meelaha aanu muddo ka dhicina wuxuu saamayn karaa oo ku dhicikaraa 100% (boqolkiiba boqol) riyaha, waxaana dhimashadu gaadhi kartaa ilaa 70% (boqolkiiba todobaatan), laakiin meelaha guriga u ah cudurkan ee uu sida joogtada ah uga dhaco dhimashada uu sababaa intaas way ka yartahay.

## Astaamha / Calaamadaha Cudurka

Cudurkan wuxuu u soo ifbaxaa laba nooc, kuwaas oo kala ah nooc kedis ah iyo nooc jiitama oo neefka muddo haya.
Nooca kediska ahi ma leh astaamo muuqda oo lagu garto, neefka uu ku dhacana si kedis ah ayuu u dilaa ; ilaa 24 saacadood gudahood. Noocan waxaa lagu arkaa meelaha uu cudurku muddo badan ka maqnaa ama ay markaas ugu horayso.
Noociisa jiitama ama mudaada haya neefka ayaa lagu arkaa astaamaha ama tilmaamaha cudurkan lagu yaqaan. Waxaana ka mid ah :

- Dhogor madoobaad (cadar)
- Qandho ama xumad sare
- Duuf
- Qufac joogto ah
- Neef qabatow
- Hiinraag ama taah
- Caatow iyo caano yareyn
- Neefsiga oo deg-deg noqda
- Lugaha hore oo uu kala fidiyo
- Socodka oo dhiba neefka

Markii la qalo neef u dhintay cudurkan isbeddelka lagu arko waxaa ka mid ah :
Dheecaan ka buuxa hunguriga cad, midkood ama labada qaybood ee sambabada oo midabku isbeddeley oo casaan nuqday, sambabada buka oo bararay una eg wax leh furuuruc ama kuus-kuus, markii la jeexo sambabada buka oo loogu tago malax, xumbo (abur) ama dheecaan midabka huruuda leh. Mar-mar sambabku wuxuu ku dhegaa feedhaha, qanjidhada sableyda way wada bararaan.



*Neef riyo ah oo Sambab qaba oo duuf ka socdo*

In kastoo cudurkani leeyahay calaamado caan ah hadana si loo xaqiijiyo waa in shaybaar lagu hubiyo.
Meelaha laga ogaado in cudurkani xoolaha ku jiro waxaa ka mid ah kawaanada haddii sambabada riyaha la baadho.
Cudurkan wuxuu badanaa xoolaha ku dhacaa xiliga roobabka ama qabowga iyo dhaxantu jiraan



*Adhi roob hayo*

## Baahsanaanta Cudurka

Cudurka ***Sambabka Riyuhu*** wuxuu ka dhacaa gobolkan Geeska Afrika ee Soomaalidu degto oo dhan iyo meelo badan oo ka mid ah adduun weynaha.

## Daaweynta iyo ka Hortagga

Maadaama cudurka Sambabka ay keento Bakteriya, daaweyntiisa waxaa loo isticmaali karaa noocyada daawooyinka ee loo yaqaan '**Antibiotiga**' ama ***Bakteriya dilayaasha*** ay xoolo-dhaqatadu u taqaan ***oksta,*** kuwaas oo ay ka mid yihiin ***Tetracycline*** iyo ***Tylosin.***
Neefka uu ku dhaco Sambabku waxaa ku haboon in la daaweeyo marka cudurku ku cusubyahay.
Sambabka Riyuhu wuxuu leeyahy ***Talaal*** lagaga hortegi karo cudurka

## Isticmaal Xumida Daawada iyo Cawaaqibkeeda

Xoolo dhaqatada Soomaaliyeed qaarkood daaweynta Sambabka waxay u isticmaalaan noocyada dawooyinka ee loo yaqaan ***Kaabsulka*** sida kan *Tetracyclinta* iyo kuwo la nooc ah.

Kaabsulka oo qiimihiisu yaryahay ayay iibsadaan, waxay kala fujiyaan ama kala siibaan qolofta labada midab leh ee daboolka ah, daawada dhexda ku jirta ee budada ah ayay weel ku shubaan oo biyo ku qasaan. Intay siriinge ku qaadaan ayay neefka kaga mudaan feedhaha dhexdooda.



*Riyo Kaabsul lagaga mudey feedhaha oo barar ka muuqdo*

Isticmaalka Kaabsulka waxaa ka imaan kara dhibaatooyin badan sababaha soo socdo dartood :

- Kaabsul waa daawo dad ee maaha mid xoolaad
- Kaabsulka waxaa loogu tala galay in afka laga liqo oo keli ah ee duriin looguma tala gelin.
- Daawada budada ah ee ku jirta Kaabsulka biyaha kuma qasanto meesha lagu mudo(duro) ayay fadhiisataa oo maal ama nabar weyn oo bararan ku noqotaa ( eeg sawirka kore).

Maadaama uu Kaabsulku yahay antibiotic oo ay qaraabo yihiin daawada loo isticmaalo cudurkan, wuxuu neefku u ekaadaa sidii wax bogsoodey, hase yeeshee muddo yar ka dib cudurkii ayaa ku soo noqda taasi waxay sababi karta in ***Jeermigii ama Bakteeriyadii keentay cudurku adkaysi u yeelato dawadii loogu tala galay ama ay la qabsato oo ay waxba ka tari weydo.***

## Saamaynta Dhaqaale ee Cudurka

Sambabka Riyuhu wuxuu ka mid yahay cudurada sida weyn u waxyeeleeya dhaqaala xoolo-dhaqatada isag oo sababa ; dhimisho xoolaad, dhicis, cad iyo caano yaraan, kharash daawo iyo talaal oo la galo, ganacsiga xoolaha (gudaha iyo dibeddaba) oo dhaawacma.

## Xakamynta iyo Dabargoynta

Si loo hakiyo ama loo joojiyo fidista cudurkan arrimaha laga doonayo xoolo-dhaqatada waxaa ka mid ah :

- Xoolaha buka iyo kuwa fayow oo la kala soocoo ama la kala saaro
- Dhakhaatiirta xoolaha, maamulka deegaanka iyo Wasaaradda Xoolaha oo si deg-deg ah loo wargeliyo.
- Isu socodka xoolaha oo la hakiyo
- Riyaha fayow oo la talaalo